

Xeerarka soo gelidda waddanka ee qoyska- iyo saaxiibka/saaxiibadda booqashada ku imaanaya oo la debciiyay

War-saxaafadeed | Taariikh: 02.07.2021

Laga bilaabo 5-ta luuliyo waxaa in ay waddanka soo galaan loo oggolaanayaa ajnebi kale oo deggan waddammada ku jira liiska waddammada saddexaad ee Midowga Yurub (EU) kuwaas oo uu Machadka caafimaadka dadweynuhu qiimayn ku sameeyay.

Dadkani waa ajnebiga xiriirrada soo socda la leh qof Norway deggan

- Carruur waaweyn iyo carruurta xaaska/sayga iyo waalid iyo waalidka carruur waaweyn/carruurta waaweyn ee xaaska/sayga
- Awoowe/ayeeyo, carruur awoowe/ayeeyo loo yahay
- Saaxiibka/saaxiibadda ka weyn 18 sano iyo carruurta saaxiibka/saaxiibadda ee aan gaarin 18 sano. Saaxiibtinnimadu waa in ay jirtay ugu yaraan sagaal bilood labada qofna ay hore u kulmeen.

Laga billaabo saqda dhexe, habaynka 5-ta luuliyo dadkaas waa laga dhaafay mamnuucii soo gelidda waddanka. Waa in ay u hoggaansamaan xeerarka ka yaalla karantiilka iyo tijaaba-qaadista sida in tijaabo layska qaado ka hor intaan waddanka la soo gelin, in xudduudka tijaabo laysaga qaado iyo in la galo karantiilka soo gelidda waddanka.

Si saaxiibka/saaxiibaddu u soo geli karaan waddanka waxaa shardi ah in ay marka hore helaan oggolaansho. [Oggolaashadaas waxaa laga codsanayaa Agaasinka arrimaha ajnebiga \(UDI\)](#). Codsiga si otomaatik ayaa looga baaraandegaa, waana bilaash. Qofkii diidmo la siiyo cabasho ma qaadan karo.

Maantaba waa loo oggol yahay in ay waddanka soo galaan xubnaha qoyska dhow, sida xaaska/seeyga/qofka nolosha lala wadaago iyo carruurta aan gaarin 18 sano.

Waakan liiska waddammada iyo aagagga liiska waddamada saddexaad ee EU ee FHI u arko in loo debcin karo xeerarka soo gelidda waddanka:

Ostareeliya

Israaiil

Jabbaan

Lubnaan

New Siiland

Waqooyiga Makedooniya

Serbiya

Kooriyada Koonfureed

Taywaan

Maraykanka

Singabuur

[Halkaan ka akhriso warbixinta soo gelidda Norway](#)